

Fariinta 5AAD

Dastuurka Soomaaliya iyo qodobada u baahan in laga heshiiyo.



Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyada Federalka ah ee Soomaaliya weli waa qabyo, si loo dhamaystiro waxaa loo baahan yahay in laga heshiiyo 11 qodob oo muhiim ah, muwaadin waxaad xaq u leedahay inaad feker kaaga ka dhiibato dastuurka si aad qayb uga noqoto dhamaystirkiisa.

Qodobada ay tahay in laga heshiiyo si dastuurka loo dhamaystiro waxay kala yihiin

1. Qaybsiga awoodaha dawliga ah ee Dawlada Federalka ah iyo Dawladaha Xubnaha ka ah.
2. Qaybsiga khayraadka dalka.
3. Awoodaha Madaxweynaha Iyo Ra'isal Wasaaraha.
4. Doorka Aqalka Sare.
5. Maqaamka Caasimada.
6. Dhismaha Amniga Qaranka.
7. Muwaadinimada/ Jinsiyadaha.
8. Qaab dhismeedka Garsoorka dalka.
9. Arimaha Maaliyada ee Dawlada Federalka iyo Dawlaha xubnaha ka ah.
10. Kuraaska Aqalka Sare ee Baarlamaanka.
11. Metelaada iyo doorashooyinka.

Si loo dhamaystiro waa in loo maro heshiis siyaasadeed, heshiis bulsho, in loo dhamaado dhamaan dhinacyada, daah furnaan, ilaalinta balamaha, wakhti cayiman oo heshiis lagu yahay, ka qaybgal dadweyne, iyo khibrada xeeldheerayaa-sha gudaha.

Arimahan waxaanu ka hadli doona Khabiir arimaha Dastuurka ah oo kasoo shaqeeyey dib u eegista Dastuurka si fiicana u fahamsan kala doorashooyinka miiska saaran si dadku faham buuxa uga helaan .